

Sharci Lr.35 ee 16 Abriil 1972.

Dheereynta muddada ay muwaadiniinta gaarka ee fuliya hawlaha notaayo.

**GUDDOOMIYAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA**

MARKUU ARKAY Xaashida kowaad ee Kacaanka;
MARKUU DHEGEYSTAY talada Golaha Xoghayayaasha ee Dawladda;
ARKAY ansixinta Golaha Sare ee Kacaanka;

WUXUU SAXIIXAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1

Ayada oo laga reebayo axkaamta Sharciga 11 Maarso 1972, notaayayaasha hadda ruqsada u haysta fulinta hawlo notaayadeed waxa ay xirfaddaas u sii-wadanayaa, sí ayaga u gaar ah, ilaa inta laga dhammeystirayo Xeerka magacaabiddooda, sí waafaqsan sharciyada hadda jira (dhaqangalka).

Qod. 2

Sharcigan waxa uu dhaqangelayaa isla markiiba (dhaqso).
Sharcigaas waxaa la geliyaa Uruurinta Rasmiga ah ee Sharciyada iyo Xeerarka Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Soomaaliya.

Qof kasta waxaa waajib ku ah in uu dhowro sharcigan, waana in loo dhowro in uu yahay sharciga Dawladda.

Muqdisho, 16 Abriile 1972.

**GUDDOOMIYAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
S/Guud Maxamed Syaad Barre**